

Maalinta Aad Leedahay Booqashada Wictaanka Dhakhtarka (Muuqaalka)

Booqashada xigta ee aad adigga ama cunugaagu ku imaanaysaan Isbitaalka Qaran ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital) waxaa lagu samayn doonaa muuqaalka aalada Zoom Communications, Inc. is an American communications technology company iyo ciwaankaaga aalada MyChart. Caafimaadka taleefanka lagu baxsho ayaa noo sahlaaya inaan ku caawino adiga iyo cunugaagaba adoon si shaqsi ah u imaan xarunta.

Waxyaabaha aad u baahan tahay kahor booqashadaada muuqaalka ah:

- Ciwaanka MyChart: Ka fiiri lifaaqan wixii macluumaad dheeraad ah oo ku aadan MyChart: [NationwideChildrens.org/family-resources-education/MyChart](https://www.NationwideChildrens.org/family-resources-education/MyChart)
- Taleefanka casriga ah, tableet-ka ama kumbuyuutarka leh kamarada iyo makarafoonka:


Haddii aad u baahan tahay turjumaan, marka aad ku biirto taleefoonka dhakhtarkaaga, dhakhtarka ayaa kugu xidhi kara turjumaan booqashada fiidyowga.

Maalinta aad booqashada leedahay, gal ciwaankaaga MyChart 15-30 daqiiqo kahor xiliga booqashada. Si aad u gasho ciwaankaaga MyChart gal barta [MyChart.NationwideChildrens.org/MyChart](https://www.MyChart.NationwideChildrens.org/MyChart)

Haddii aad isticmaaleyso kumbiyuutar:

Soo gal kahor ballantaada

Fadlan buuxi Gelitaanka Oonleenka ah kahor intaadan bilaabin ballantaada caafimaadka oonleenka ah.




Inta lagu jiro Gelitaanka Oonleenka ah, waxaad:

- Xaqiijin doontaa oo aad cusbooneysiin doontaa macluumaadka shaqsiyeed, caymiska iyo caafimaadka
- Saxiixi doontaa foomamka ogolaanshaha
- Buuxin doontaa foomka su'aalaha


Si toos ah ayaa laguugu gudbin doonaa ballantaada caafimaadka taleefanka marka aad dhammaystirto hanaanka gelitaanka oonlaynka.

Ku soo biir Booqashada Muuqaalka ah


1. Kadib markaad dhammaystirto gelitaanka oonleenka, waxaad diyaar u tahay inaad bilowdo booqashada muuqaalka ah.
 - Waxaad ku martiqaadi kartaa dadka kale inay kula soo biiraan booqashada. Qoraal ama iimayl leh xiriiriye si aad ugu biirto booqashada muuqaalka aya loo diri doonaa.
 - Haddii aad diyaar u tahay inaad ku biirto: dooro "**Join Video Visit (Ku biir oo Booqo Muuqaalka)**" Xiriirku wuu shaqeynayaa 30 daqiiqo ka hor waqtiga ballantaada.




2. Kadib markaad doorato "**Join Video Visit (Ku biir oo Booqo Muuqaalka)**," baroowsarkaafa caadiga ah ee qalabkaaga aya bilaaban doona.
3. , Waqtigaan xadirka ah, waxaad:
 - Hubin kartaa kamaradaada iyo makarafoonkaaga.
 - Tijaabin kartaa sameecadahaaga.
 - Beddeli kartaa waxyaabaha kaa dambeeya.
 - Beddeli kartaa magaca shaashada kasoo muuqanaya (marka laga reebo booqashooyinka kooxda).
4. Markaad diyaar noqoto, dooro badhanka "**Join Call (Ku biir Wicitaanka)**".



Waxaad ku biiri doontaa qol sugitaan oo internetka ah ilaa dhakhtarkaagu uu ku soo biiro wicitaanka.





Fahan Booqashada Muuqaalka ah




1. Dooro astaanta makarafoonka si aad u aamusto ama aad u furto codka.
2. Dooro astaanta kaamarada si aad u shido ama u damiso muuqaalka socda.
3. Isticmaal astaanta Chat (wada sheekaysi) haddii aad rabto inaad fariin u dirto dhakhtarka.
4. Dooro "**Leave call (Ka bax wicitaanka)**" si aad u joojiso booqashada muuqaalka.

Adeegsiga Aabka Moobaylka ee MyChart

1. Fadlan buuxi Gelitaanka Oonleenka ah kahor intaadan bilaabin ballantaada caafimaadka oonleenka ah.
2. Inta lagu jiro Gelitaanka Oonleenka ah, waxaad:
 - Xaqiijin doontaa oo aad cusbooneysiin doontaa macluumaadka shaqsiyeed, caymiska iyo caafimaadka
 - Saxiixi doontaa foomamka ogolaanshaha
 - Buuxin doontaa foomka su'aalaha
 - Si toos ah ayaa laguugu gudbin doonaa ballantaada caafimaadka taleefanka marka aad dhammaystirto hanaanka gelitaanka oonlaynka.
3. **Hubi inaad ansixiso oggolaanshaha adeegsiga kaamaradaada iyo makarafoonkaaga.**
4. Kadib markaad dhammaystirto gelitaanka oonleenka, waxaad diyaar u tahay inaad bilowdo booqashada muuqaalka ah.
5. Waqtigaan xaadirka ah, waxaad:
 - Hubin kartaa kamaradaada iyo makarafoonkaaga.
 - Tijaabin kartaa sameecadahaaga.
 - Haddii aad diyaar u tahay inaad ku biirto: dooro **"Join call (Ku biir wicitaanka)."** Linkugu wuxuu shaqeynayaa 30 daqiiqo kahor wakhtiga ballantaada.



Waxaad ku biiri doontaa qol sugitaan oo internetka ah ilaa dhakhtarkaagu uu ku soo biiro wicitaanka.



Talooyin

1. Kuwani waa baroowsarkaaga kombiyuutarka ee la adeegsan karo. Haddii aadan isticmaaleyn mid ka mid ah kuwaan, muuqaalka waxaa laga yaabaa inaanu shaqeynin:

		Android	Windows	MacOS
Chrome	Waa lagu talinayaa	Waa lagu talinayaa	Waa lagu talinayaa	Waa lagu talinayaa
Edge	Lama adeegsan karo	Laguma talinayo	Waa lagu talinayaa	Waa lagu talinayaa
Safari	Waa lagu talinayaa	Ma qusayso	Ma qusayso	Waa lagu talinayaa
Firefox	Laguma talinayo	Laguma talinayo	Laguma talinayo	Laguma talinayo
Opera	Lama adeegsan karo	Laguma talinayo	Laguma talinayo	Laguma talinayo
Samsung Internet	Ma qusayso	Laguma talinayo	Ma qusayso	Ma qusayso

2. Haddii aad isticmaaleyso aalad Apple ah oo aad furto qaybta sheekaysiga, waxaa laga yaabaa inay aad u weynaato. Waxaad gujin kartaa astaanta sheekaysiga mar kale si aad u xirto.
3. , Wixii ku saabsan arrimaha farsamada MyChart, wac (614) 938-3000.



